OGAYSIIS WADAJIR AH OO KU SAABSAN HAB-DHAQANKA ASTURNAANTA

BILAABMAYA **16 Febraayo, 2026**

MACLUUMAADKAAGA
XUQUUQAHAAGA.
MASUULIYADAHEENA.

Ogaysiiskani waxa uu sharraxaya sida loo isticmaali karo ama loo bixin karo macluumaadkaaga caafimaad ee laguugu aqoonsan karo, iyo sida aad ku heli karto macluumaadkaas.

Fadlan si taxaddar leh u eeg.

XUQUUQAHAAGA

Marka ay timaado macluumaadka caafimaadkaaga, waxaad leedahay xuquuqo gaar ah.
Qaybtani waxay sharraxaysaa xuquuqdaada iyo qaar ka mid ah mas'uuliyadaha naga saaran inaan ku caawinno.

Helitaanka nuqul elektaroonig ah ama mid warqad ah oo ku saabsan diiwaankaaga caafimaadka.

- Waxaad codsan kartaa qoraal ahaan si aad u eegto ama aad u hesho warqad elektaroonik ah ama nuqul waraaq oo rikoodhka caafimaadkaaga ah iyo macluumaadka kale ee caafimaadka ee aan hayno. Na waydii sida tan loo sameeyo.
- Waxaan ku siin doonnaa nuqul ama koobitaan (summary) ee macluumaadkaaga caafimaadka. Waxaan qaadi karnaa lacag macquul ah oo ku salaysan kharashka nuqul-samaynta.

Na waydii si aad u saxdo diiwaankaaga caafimaad.

- Waxaad na waydiin kartaa si aad u saxdo macluumaadka caafimaadka ee ku saabsan adiga ee aad u malaynayso in aanu sax ahayn ama aanu dhamaystirnayn. Na waydii sida tan loo sameeyo.
- Waxaan odhan karnaa "maya" codsigaaga, laakiin waxaan kuugu sheegi doonaa sababta qoraal ahaan.

Codso isgaarsiin qarsoodi ah.

- Waxaad na waydin kartaa in aan kuula soco xidhiidhno si gaar ah (tusaale ahaan telefoon guri ama xafiis) ama inaan boostada kuugu soo dirno ciwaan ka duwan kan aad deggan tahay.
- Waxaan odhan doona "haa" dhammaan codsiyada macquulka ah.

Na weyddiiso inaan xaddidno waxa aan isticmaalno ama aan wadaagno

- Waxaad naga codsan kartaa inaanan isticmaalin ama aan la wadaagin macluumaad caafimaad oo gaar ah oo ku saabsan daaweynta, lacag bixinta ama hawlgalladeenna.
    - Na loogama baahna in aan kugu waafaqno codsigaaga, oo waxaan odhan karnaa "maya" hadii ay saamayn karto daryeelkaaga.

- Waxaad naga codsan kartaa inaanan la wadaagin macluumaadkaaga caafimaad ee elektaroonigga ah bixiyeyaashaada kale iyada oo loo marayo Epic Care Everywhere, oo ah Nidaamka Isweydaarsiga Macluumaadka Caafimaadka ee elektaroonigga ah (HIE). Si aad u samayso codsigan, fadlan booqo: https://www.uwmedicine.org/patient-resources/hie-ce

    - Waxaad ka heli kartaa bixiyeyaasha kale ee ka qaybqaata Epic Care Everywhere mareegtan: https://www.epic.com/careeverywhere/.

- Haddii aad si buuxda jeebkaaga uga bixiso adeeg ama shay daryeel caafimaad, waxaad naga codsan kartaa inaanan macluumaadkaas la wadaagin caymiskaaga caafimaadka ujeedooyinka lacag bixinta ama hawlgalladeenna.
    - Waxaan dhihi doonnaa "Haa" ilaa uu jiro sharci nagu qasbaya inaan la wadaagno macluumaadkaas mooyee.

Hel liiska kuwan aan la wadaagnay macluumaadka

- Waxaad dalban kartaa liis (xisaabin) wakhtiyada aan wadaagnay macluumaadkaaga caafimaad lix sano ka hor wakhtiga aad codsatay, cida aan la wadaagnay, iyo sababta.
- Waxaan liiskaas ku dari doonnaa dhammaan shaacinnadii aan samaynay marka laga reebo kuwa khuseeya daaweynta, lacag bixinta, iyo hawlgallada daryeelka caafimaadka, iyo shaacinnada kale ee gaarka ah (sida mid kasta oo aad adigu naga codsatay inaan samaynno). Waxaan sannadkii hal mar ku siin doonnaa liiskaas oo bilaash ah, laakiin waxaan qaadi doonnaa lacag macquul ah oo ku salaysan kharashka haddii aad codsato mid kale 12 bilood gudahood.

Helitaanka nuqul ka mid ah ogeysiiskan asturnaanta

- Waxaad codsan kartaa nuqul warqad ah oo ogeysiiskan ah waqti kasta, xataa haddii aad horay u oggolaatay inaad ogeysiiska ku hesho hab elektaroonig ah. Waxaan ku siin doonnaa nuqul warqad ah si degdeg ah.

Doorashada qof ku matala

- Haddii aad qof siisay awood qareen caafimaad ama haddii qof uu yahay mas'uulkaaga sharciga ah, qofkaasi wuxuu adeegsan karaa xuquuqdaada wuxuuna samayn karaa doorashooyin ku saabsan macluumaadkaaga caafimaadka
- Waxaan hubsan doonaa in qofku haysto awoodan oo uu ku matali karo inta aanaan qaadin wax talaabo ah.

Gudbi cabasho haddii aad dareento in xuquuqahaagii la jabiyay ama xadgudbay

- Waxaad gudbin kartaa cabasho haddii aad dareento inaanu ku xadgudubnay xuquuqdaada, adiga oo la xiriiraya Xafiiska U Hoggaansanaanta ee UW Medicine (UW Medicine Compliance) ama Xafiiska U Hoggaansanaanta ee Xarunta Kansarka Fred Hutchinson (Fred Hutchinson Cancer Center Compliance Office). Kala xiriir hay'adda aad ka heshay daryeelka adigoo isticmaalaya macluumaadka xiriirka ee ku yaalla xagga hoose ee ogaysiiskan.
- Sidoo kale, waxaad cabasho u gudbin kartaa Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah ee Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Aadantaha ee Maraykanka (U.S. Department of Health and Human Services Office for Civil Rights) adiga oo warqad u diraya cinwaankan 200 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20201, ama wacaya 1.800.368.1019, ama iimeel u diraya OCRComplaint@hhs.gov, ama booqanaya mareegta www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/complaints/.
- Kaagama aargoosan doono gudbinta cabasho.

DOORASHOOYINKAAGA

Macluumaadyada caafimaad qaar, waxaad noo sheegi kartaa doorashadaada ku saabsan waxa aan la wadaageyno.
Hadii aad hayso doorasho cad oo ku saabsan sida aan u wadaageyno macluumaadkaaga xaaladaha hoos ku qoran, nala hadal. Noo sheeg waxaad rabto inaan sameyno, waxaanuna raaci doonnaa tilmaamahaaga.

Waxaad leedahay ikhtiyaarka iyo xuquuqda ladaba in aad noo sheegto inaan :

- La wadaagno macluumaadka xubnaha qoyskaaga, asxaabtaada dhow, ama dadka kale ee ku lug leh daryeelkaaga.
- La wadaagno macluumaadka xaaladaha gargaarka masiibooyinka.
- Ku darno macluumaadkaaga diiwaanka isbitaalka (hospital directory).

Haddii aadan awoodin inaad noo sheegto dookhaaga, tusaale ahaan haddii aad miyir-doorsoon tahay (suuxsan tahay), waxaa dhici karta inaan horay u soconno oo aan la wadaagno macluumaadkaaga haddii aan aaminsannahay inay dantaadu ku jirto. Sidoo kale, waxaan la wadaagi karnaa macluumaadkaaga marka loo baahdo si loo yareeyo khatar weyn oo soo fool leh oo ku wajahan caafimaadka ama badbaadada.

Marka laga reebo xaalado kooban mooyee, lama wadaagi doono macluumaadkaaga ilaa aad na siiso oggolaansho qoraal ah ujeedooyinkan soo socda :

- Ujeedooyinka suuq-geynta (Marketing)
- Iibinta macluumaadkaaga
- Wadaagista ugu badan ee qoraalada daaweynta cilmi-nafsiga (psychotherapy notes)

Haddii ay jirto ururin dhaqaale (fundraising):

- Waxaa laga yaabaa inaan kula soo xiriirno anagga oo sameynayna dadaallo lacag ururin ah, laakiin waxaad noo sheegi kartaa inaanan mar dambe kula soo xiriirin. Wixii macluumaad dheeraad ah ama la xiriirka UW Medicine ama Fred Hutch Philanthropy, fiiri www.uwmedicine.org/about/compliance/patients-and-fundraising.

ISTICMAALADAYADA IYO SHAACINTAYADA

Sideen u isticmaalnaa ama u wadaagnaa macluumaadkaaga caafimaadka?
Sida caadiga ah, waxaan u isticmaalnaa ama u shaacinaa (la wadaagnaa) macluumaadkaaga caafimaadka siyaabaha soo socda.

Daaweyntaada

- Waxaan isticmaali karnaa macluumaadkaaga caafimaadka, waxaana la wadaagi karnaa xirfadlayaasha kale ee ku dawaynaya, oo ay ku jiraan nidaamyada elektaroonigga ah ee Isweydaarsiga Macluumaadka Caafimaadka (HIEs). Nidaamyadan waxay u oggolaanayaan bixiyeyaashaada daryeelka inay helaan macluumaadkaagii ugu dambeeyay si ay kuu daryeelaan. Fadlan booqo xiriirka soo socda si aad wax badan uga ogaato HIEs: https://www.uwmedicine.org/patient-resources/hie-ce.

Tusaale: Takhtar kaa dawaynaya dhaawac ayaa weydiinaya takhtar kale macluumaad iyo diiwaanno ku saabsan xaaladdaada caafimaad ee guud.

Socodsiin ururkayaga

- Waxaan u isticmaali karnaa oo aan u la wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaadka si aan u socodsiino howlaheena, u horumarino tayada daryeelka, iyo inaan kula soo xiriirno markay lagama maarmaan tahay. Mararka qaarkood, waxaan ka saarnaa macluumaadka laguugu aqoonsan karo si aan u fulino hawlahan.

Tusaale: Waxaan u isticmaalnaa macluumaadkaaga caafimaadka si aan u maareyno daaweyntaada iyo adeegyada laguu fidinayo.

Biil-bixinta adeegyadaada

- Waxaan u isticmaali karnaa oo aan u la wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaadka si aan biil ugu dalacno oo aan lacag uga helno qorshayaasha caafimaadka ama hay'adaha kale.

Tusaale: Waxaan siinaa macluumaadka adiga kugu saabsan qorshahaaga caymiska caafimaadka si ay u bixiyaan kharashka adeegga laguu qabtay.

Sidee kale ayaan u isticmaali karnaa ama aan u wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaad?
Waxaa la noo ogolyahay ama la nooga baahan yahay in aan u wadaagno macluumaadkaaga habab kale - badanaa habab ka qaybqaata wanaaga dadwaynaha, sida caafimaaka bulshada iyo cilmi baadhista. Waa inaan buuxinnaa shuruudo badan oo sharci ah ka hor intaanan u wadaagin macluumaadkaaga ujeedooyinkan. Wixii macluumaad dheeri ah eeg: **www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/index.html**.

Caawinta caafimaadka bulshada iyo arimaha badbaadada

- Waxaanu la wadaagi karnaa macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan xaaladaha qaarkood sida:
  - Ka hortagida xanuun
  - Ka caawinta u yeeridda badeecadaha cilladaysan (product recalls)
  - Wargalinta dhibaatooyinka dawooyinka
  - Wargalinta faraxumayn laga shakisanyahay, dayac, ama khilaaf guri
  - Ka hortaga ama yaraynta dhibaato halis ah oo qofka caafimaadkiisa ama badbaadadiisa

Samayn cilmi baadhis

- Xaaladaha qaarkood, waxaan u isticmaali karnaa ama u la wadaagi karnaa macluumaadkaaga cilmi-baarista caafimaadka. Mashruucyada cilmi-baarista ee ay ku jiraan bukaanadu waa in lagu ansixiyo nidaam dib-u-eegis gaar ah si loo ilaaliyo badbaadada, daryeelka, iyo sirta bukaanka.

Si aan u raacno sharciga

- Waxaan la wadaagi doonnaa macluumaadka adiga kugu saabsan haddii sharciyada gobolka ama federaalku ay u baahan yihiin, oo ay ku jiraan Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha haddii ay rabto inay aragto inaan u hoggaansannahay sharciga asturnaanta federaalka.

Ka jawaabista codsiyada ku-deeqidda xubnaha iyo unugyada jirka

- Waxaan macluumaadkaaga caafimaadka la wadaagi karnaa ururrada qaabilsan soo iibinta ama helidda xubnaha jirka (organ procurement organizations).

La shaqaynta baaraha caafimaadka ama agaasimaha aaska.

- Waxaan macluumaadka caafimaadka la wadaagi karnaa baaraha dhimashada (coroner), baaraha caafimaadka ama agaasimaha aaska marka uu qofku dhinto.

Ka jawaabista magdhowga shaqaalaha, fulinta sharciga, iyo codsiyada kale ee dawladda

- Waxaan isticmaali karnaa ama la wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan:
    - Dacwadaha xaqsiinta shaqaalaha.
    - Ujeedooyinka xoojinta sharciga ama masuul xoojin sharci
    - Wakaaladaha kormeerka caafimaadka hawlaha uu ogolado sharcigu
    - Shaqooyinka gaarka ah ee dawlada sida milatariga, amaanka guud, adeegyada ilaalada madaxwaynaha

Ka jawaabista dacwadaha iyo tallaabooyinka sharciga ah

- Waxaan la wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaadka si aan uga jawaabno amarka maxkamadda ama amarka maamulka, ama si aan uga jawaabno u-yeeridda maxkamadda.

Ilaalin dheeraad ah oo ku saabsan macluumaadkaaga caafimaadka

- Waxaa jira ilaalin sharci oo dheeraad ah oo ku saabsan macluumaadka caafimaadka ee ku saabsan caabuqyada galmada lagu kala qaado, diiwaannada daaweynta isticmaalka maandooriyaha (SUD) ee ka yimaada barnaamijyada ay dawladda faderaalku caawiso, diiwaannada caafimaadka maskaxda (dhimirka), iyo macluumaadka HIV/AIDS. Marka uu sharcigu u baahdo, la wadaagi mayno macluumaadka noocan ah annaga oo aan haysan oggolaansho qoraal ah oo aad adigu bixisay.
- La wadaagi mayno diiwaannadaada SUD (isticmaalka maandooriyaha) ee ka yimaada barnaamijyada ay dawladda faderaalku caawiso si dacwad sharci ah looguugu soo oogo, ilaa aad adigu oggolaansho qoraal ah ka bixiso ama maxkamadi ay nagu amarto mooyee.
- Xaaladaha qaarkood, macluumaadka caafimaadka ee bukaanka aan qaan-gaarin (ka yar 18 sano) wuxuu heli karaa ilaalin sharci oo dheeri ah.

MASUULIYADEENA

- Waxaa la nooga baahan yahay sharci ahaan in aan sii wadno asturnaanta iyo amaanka maclumaadkaaga caafimaad ee ilaashan.
- Waxaan ku ogaysiin doonaa si dhakhso ah haddii uhogaasami la’aani dhacdo taas oo waxyeeli karta asturnaanta iyo amaanka macluumaadkaaga.
- Waa in aan raacnaa waajibaadyada iyo waxqabadyada asturnaanta ee lagu qeexay ogaysiiskan oo aan ku siino nuqul ka mid ah.
- Ma isticmaali doono ama ma wadaagi doono macluumaadkaaga aan ahayn sida aan ku qeexnay halkan ilaa aad noogu sheegto qoraal ahaan inaan sidaas sameyn karno mooyee. Haddii aad noo sheegto inaan wadaagi karno, waad beddeli kartaa go'aankaaga waqti kasta. Noo soo sheeg qoraal ahaan haddii aad beddesho go'aankaaga

Macluumaad dheeraad ah:
www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/noticepp.html.

Isbeddellada lagu sameeyo Shuruudaha Ogeysiiskan

Waxaan beddeli karnaa shuruudaha ogeysiiskan, isbeddelladuna waxay khuseyn doonaan dhammaan macluumaadka aan adiga kaa hayno. Ogeysiiska cusub waxaa lagu heli karaa codsi, isagoo yaalla xafiiskayaga, goobaha daryeelka caafimaadka (clinical settings), iyo mareegahayaga (website).

Ogaysiiskani wuxuu khuseeyaa UW Medicine iyo Fred Hutch iyo shaqaalahayaga caafimaadka iyo shaqaalaha ee ku siiya daryeel ama adeegyo. UW Medicine iyo Fred Hutch waa hay'ado daryeel caafimaad oo sharci ahaan kala badax-banaan. laakiin waxay isla wadaagi karaan macluumaadka midba midka kale ujeedooyinka lagu qeexay ogeysiiskan, oo ay ku jiraan hawlaha daaweynta, lacag bixinta iyo hawlaha daryeelka caafimaadka ee iyo hawlaha daryeelka caafimaadka ee la xiriira nidaamka daryeelka caafimaad ee aan ka wada tirsan nahay. Intaa waxaa sii dheer, UW Medicine iyo Fred Hutch waxay si sharci ah u maamulaan xarumo daryeel caafimaad oo kala duwan oo ku yaal gobolka Puget Sound, mid walbana si gooni ah ayuu uga qaybqaataa hab-maamulkiisa caafimaad ee nidaamsan oo uu la leeyahay ururada kale.

UW Medicine waxa ku jira hay'adaha caafimaad ee soo socda: Xarunta Caafimaadka iyo Rugaha Caafimaadka ee Harborview, Xarunta Caafimaadka iyo Rugaha Caafimaadka ee Valley, Xarunta Caafimaadka iyo Rugaha Caafimaadka ee UW, Daryeelka Aasaasiga ah ee UW Medicine, Airlift Northwest.

Hay’adaha caafimaadka ee Fred Hutch waxaa lagu taxay mareegta Fred Hutch oo ah https://www.fredhutch.org/en/about/fred-hutch-locations.html

UW MEDICINE COMPLIANCE
Box 358049
Seattle, WA 98195-8049
206.543.3098 ama 855.211.6193
comply@uw.edu
uwmedicine.org/nopp

FRED HUTCHINSON CANCER CENTER COMPLIANCE OFFICE
1100 Fairview Ave N
Mail Stop LG-530
Seattle, WA 98109-1023
206.606.7154 or 866.353.6098
privacy@fredhutch.org

Rev 2/16